

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	الْجُمْهُورِيَّةُ الرَّسْمِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةِ صُومَالِيْلَانْد	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 3aad	Cadadka: 7aad ee July	Taariikh: 02/08/2014
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:	
1) SOOMA BIXIN	
<u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER	186
NIDAAMIYAYAASHA	
IYO	190
DIKREETOYINKA	192
MADAXWEYNAHA:	193
2) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0403/072014	194
Aasaasidda Ciidanka Dab-Dmiska	196

Qaranka

196

- 3) XEER MADAXWEYNE Lr: 0402/072014
Magacaabid Gobol
- 4) XEER MADAXWEYNE Lr: 0404/072014
Magacaabid
- 5) XEER MADAXWEYNE Lr: 0405/072014
Magacaabid
- 6) XEER MADAXWEYNE Lr: 0406/072014
Magacaabid
- 7) Xilka Qaadis; 07/2014
- 8) XEER MADAXWEYNE Lr: 0407/072014
Magacaabid
- 9) Xilka Qaadis; 07/2014
- 10) Xilka Qaadis; 07/2014

198

199

200

**QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,
WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER
NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM**

202

- 11) SOOMA BIXIN

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &
GO'AANADA MAAMUL**

- 12) Amar Xayiraad; Maxkamada
Degmada Hargeysa
- 13) Qaraar Xayiraad
Maxkamadeed; Maxkamada Gobolka
Awdal

QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA

14) SOOMA BIXIN



QAYBTA LABAAD:
XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:



XEER MADAXWEYNE Lr:0403/072014

Aasaasidda Ciidanka Dab-Demiska

Qaranka

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay:

Qodobka 76aad ee
Xeerka is-maamulka
Gobollada iyo
Degmooyinka Xeer
Lr.23/2007;

Markuu arkay:

Khatarta baaxadda leh
uu dalka iyo dadka ku
hayo dabku;

Markuu arkay:

In ay daruuri tahay in
la helo cid
masuuliyadi si gaar
ah uga saran tahay la
dagaalanka dabka;

Markuu garawaaqsaday:

In loo baahan-yahay
cid si gaar ah ugu
xilsaaran la
dagaalanka dabka, ka
tala-bixinta iyo isku
duwidda hawlaha a
tacaalidda dabka;

Markuu hubsaday:

In Qaranku u baahan-yahay cid si gaar ah ugu xilsaaran la dagaalanka dabka, ka tala-bixinta iyo isku duwidda hawlaha la xidhiidha la dagaalanka iyo ka hortagga dabka;

Markuu six eel dheer:

Ula tashaday dadwaynaha iyo laamaha dawladeed ee ay khuseyso;

Wuxuu soo saaray;

Qodobka 1aad
Aasaas Dab-damiska

Waxa halkan lagu Aasaasay Ciidanka Dab-Demiska Qaranka oo leh Qofnimo Qaanuuneed, xaruntiisuna tahay Caasimadda Jamhuuriyadda Somaliland, laaman ka furan Kara Gobollada dalka, kaas oo hoos imanaya Ciidanka Booliiska oo ku le awoodaha kala ah:

1. Helidda warbixinada shaqada, maaliyadda, qiimaynta la socodka siyaasadda, halbeegyada iyo tilmaamaha guud ee Xukuumadda, baabi'inta ku xad-gudubka maamulka iyo awoodda iyo u gudbinta Xukuumadda Dhexe odoraska Miisaaniyadda.
2. Awoodda kala hormarinta qorshayaasha oo mudnaanta lagu kala siinayo qorshayaasha.

Qodobka 2aad
Ujeedada Dab-damiska

Ujeedada Dab-demisku waa inuu ka badbaadiyo bulshada kahtarta dabka.



Qodobka 3aad
Xilka iyo Waajibaadka

Xilka iyo waajibaadka Ciidanku waa:

1. Dejinta qorshayaal iyo cilmi-baadhisaha lagama-maarmaanka u ah horumarinta ujeedooyinka iyo hababka ka hortagga iyo xakamaynta dabka, iyada oo loo eegayohorumarinta xaga wershedaha iyo dhismaha.
2. Si degdeg ah uga jawaabidda marka ay dhacaan Shilalka dabku si loo yareeyo khasaarahooda xaga Nafta iyo Maalkaba iyada oo lala xidhiidhayo hay'adaha kale ee ay khusayso.
3. Fulinta iyo dabagalka qorshayaasha iyo hababka gaarka u ah hawlaha dab-demiska iyo badbaadinta dadka iyo hantida.
4. Fulinta iyo dabagalka qorshayaasha iyo hababka gaarka u ah hawlaha dab-demiska iyo badbaadinta.
5. Fidinta wacyi-gelina ka hortaga khataraha dabka iyo shilalka iyada oo loo marayo warbaahinta si loo xaqiijiyo ujeedooyinka ka hortagga dabka.
6. Dejinta, rakibaadda iyo dayactirka hab-tilmaama (fire alarm) marka dab kaco iyo qalab lagu damiyo dabka.
7. Diyaargaraynta iyo fulinta talaabo kasta oo kale oo looga golleeyahay xaqiijinta ka hortagga dabka iyo suulinta dhibaataadiisa.

Qodobka 4aad
Awoodaha Dab-damiska

1. In ay galaan goobaha dabku ka kaco iyaga oo dhawraya xurmada hoyga.
2. In ay la wareegaan hantida guurtada ah e lagama maarmaanka u noqota xakamaynta dabka.

3. Ka saarida dadka ku xeeran goobta/goobaha dabku ka kaco.
4. Hagidda hawlaha gurmada iyo baadinta ee lagula tacaalayo dabka.



Qodobka 5aad
Qaab-dhismeedka Ciidanka Dab-damiska

Qaab-dhismeedka Ciidanka Dab-damiska waxa loo raacaya habka Ciidanka Booliiska Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 6aad
Xilka iyo Waajibaadka Taliyaha Ciidanka Dab-damiska

Xilka iyo waajibaadka ciidanka dab-damisku waa:

1. Hogaaminta, Ciidanka iyo hawlaha gurmada Dab-damiska.
2. Dejinta iyo horumarinta halbeegyada lagama-maarmaanka u ah ka kortagga iyo la dagaalanka Dab-damiska.
3. Dejinta qorshayaal lagu kobcinayo, isla markaana kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadaha lagula dagaalamo dabka.
4. U gudbinta hay'adaha ay khusayso warbixinta iyo talooyin la xidhiidha khatarta dabka e dadka soo foodsaari karta.
5. Diyaargaraynta miisaniyada Ciidanka dab-damiska iyo u gudbinta Hay'adaha ay khusayso.


Qodobka 7aad
Xilka iyo Waajibaadka Taliyaha Ku-xigeenka Ciidanka Dab-damiska

Xilka iyo waajibaadka Taliye Ku-xigeenka waa:

1. Ka gacnsiinta taliyaha Ciidanka Dab-damsika gudashada Xilkiisa.
2. Hogaaminta waaxda ama waaxaha uu u xilsaaro hogaamintooda.

3. Qabashada xilkiisa marka uu maqan yahay ama uu sabab kale u gudankari waayo xilkiisa.

Qodobka 8aad
Hogaamada Ciidanka



Qaybaha ay ka koobnaanayaan Hogaamada Ciidanka, xilka iyo waajibaadkooda waxaa qeexata Taliyaha Ciidanka Booliiska.

Qodobka 9aad
Magacaabista Taliyaha iyo Taliye Ku-xigeenka
Ciidanka Dab-damiska

Taliyaha iyo Taliye Ku-xigeenka Ciidanka Dab-damiska waxaa soo magacaabaya Taliyaha Ciidanka Booliiska marka uu la tashado Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2613/072014

DATE ... 05/07/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0402/072014

Magacaabid Gobol

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay:

Qodobka 109aad, faqradiisa 3aad Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:

Qodobka 10aad ee xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax ka beddelidda Qaab-dhismeedka Dalka;

Markuu Tixgeliyey:

Codsiyada ka yimid Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka, Culimada iyo Odayaasha Deegaanada;

Markuu Dhegeystay:

Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

Markuu Ku Qancay:

In maamulada loo dhaweeyo shacbiga oo hoos loo daadajiyo;

Wuxuu Go'aasaday;

In uu u magacaabo Gobolka Xaysimo oo magaalo madax u tahay Taleex, oo ka Koobnaan doona Degmada Sarmaanyo, Degmada Xalin, Degmada Carroolay iyo Degmada God-aalo.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuur

REPUBLIC OF



Somaliland

OMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2622/072014

DATE: 05/07/14



XEER MADAXWEYNE Lr:0404/072014

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa
2aad ee Dastuuka
Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ay
Wasaaraduhu u leeyihiin
Dalka iyo Dhismaha
Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta
jagada Wasiirka
Wasaaradda Xidhiidhka
Goleyaasha, Cilmi
Baadhista iyo Technology-
yadda ee JSL;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo
magacaabay;

Wuxuu Go'aasaday;

In Mudane, Cali Xaaamud Jibriil, laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi Baadhista iyo Technology-yadda ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2624/072014

DATE ... 07/07/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0405/072014

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa
2aad ee Dastuuka
Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ay
Wasaaraduhu u leeyihiin

Dalka iyo Dhismaha
Qaranka;

Markuu Arkay:

In baahi loo qabo buuxinta
jagada Wasiirka ku-
xigeenka Wasaaradda
Kalluumaysiga iyo
Khayraadka Badda ee JSL;

Markuu Ka Fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay:

In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu Go'aasaday;

In Mudane, Cabdi-Kariin Axmed Mooge, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  OMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2625/072014

DATE ... 07/07/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0406/072014

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa
3aad ee Dastuuka
Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ay La-
taliyayaasha
Madaxweynuhu u leeyihiin
Dalka iyo Dhismaha
Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta
jagadan;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu Go'aasaday:

In Mudane, Maxamed Iid Dhinbiil, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado La-taliyaha Madaxweynaha ee arrimaha Bulshada ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  OMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2627/072014

DATE ... 07/07/14

Ku: Mudane, Yuusuf Jaamac Buraale
La-taliyihii Arrimaha Bulshada ee Hore ee
Madaxweynaha JSL

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahadcelinayaa mudadii aad soo haysay xilka La-taliyaha Arrimaha Bulshada ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. Xilalka Qaranka ayay dabcigeeda tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka La-taliyaha Arrimaha Bulshada ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  OMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2643/072014

DATE: 12/07/14



XEER MADAXWEYNE Lr:0407/072014

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee
Dastuuka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland,


Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay
Gudoomiyayaasha
Gobolladu u leeyihiin
dhismaha Qaranka,

Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta
jagadan;

Markuu La Tashaday: Wasiirka Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
Jamhuuriyadda
Somaliland,

Wuxuu Go'aasaday;

In Mudane, Cali Cawil Cabdi laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland.



In Mudane, Maxamud Cali Axmed laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  OMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2644/072014

DATE ... 12/07/14


Ku: Mudane, Jamaal Xuseen Hurre
Guddoomiyihii Hore ee Gobolka Daad-madheedh

Ujeeddo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan Kaaga Mahadinayaa Mudadii aad soo haysay xilka Guddoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland. Xilalka Qaranka ayay dabcigeeda tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Gudoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Haddaba, waxaan kaa rajynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Cali Cawil Cabdi oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2645/072014

DATE ... 12/07/14

Ku: Mudane, Faarax Cabdi Xasan
Guddoomiye Ku-xigeenkii Hore ee Gobolka Daad-madheedh

Ujeeddo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan Kaaga Mahadinayaa Mudadii aad soo haysay xilka Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Daad-madheedh Jamhuuriyadda Somaliland. Xilalka Qaranka ayay dabcigeeda tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Gudoomiye ku-xigeenka Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Maxamuud Cali Axmed oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

JAMHUURIYADA  SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGEYSA

MDH/DML/134/2014

29/06/14

Ku: Idaacadda Radio Hargeysa

Ku: Dhamaan Warbaahnta Madaxa Banaan

Ku: Maayrka Caasmadda Hargeysa

Ku: Agaasmaha Waaxda Dhulka ee Dawlada Hoose

Ku: Taliyaha Saldhiga Cabd Iidaan Ee Hargeysa

Ku: Maayrka ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa

Ku: Xog hayaha Dawladda Hoose Hargeysa

Ku: Xafiska Nootayooyinka Hargeysa

Ku: Xafiiska Garyaqaanka Guud

UJ: - Amar Xayraad Beer Dhaxal ah ku taala
Degmada 31may Xafada sh.Nuur

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:-

Arjga Codsga ah Ee uu
Maxkamadda u soo qortay
Yuusuf Cabdi Jaamac kuna
Codsanaayo in loo Xayiro
Beerta Dhaxalka ah Ee ka
dhaxaysa Cabdi Jaamac iyo
Hassan Haybe oo ilma Bah
Xaali Beertaan oo
Jihooyinkeedu kala yihiin.

Bari.....Beerta ilma Suudi

Galbeed.....Beerta ilma qalinle

Koonfur.....Buur

Waqooyi.....Waddo

Dhulkaasi oo ku yaala Degmadda Ib/koodbuur

Maxkamadu Waxay u Cuskatay Xayiraadan Qod:
294 295. 296 XHM.


Asbaabta Sare ku xusan iyo qodobada sharci Ee
sare ku xusan Darteed waxay Maxkamadu laga
bilaabo manta 29/06/2014 Xayiraad Saartay
beertan dhaxalka ah ku taala Degmadda 31may Ee
jihooyinkeeduna sare ku xusan yihiin in aan la iibin
Karin la rahmi Karin la kirayn Karin la dhisi Karin
sifo kalana loo badali Karin Ilaa amar danbe
maxkamadda ka soo baxayo

ALLAA MAHAD LEH

C/raxmaan Maxamed Mowliid

Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye: khadra Xasan Nuux



JAMHUURIYADA SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA AWDAL

SUM/MGA/DML/02/91/2014 17/07/2014.

KU: TALIIYAHA SALDHIGA DHEXE EE POLICEKA
DEG/ BORAMA.

OG: QAREEN DACWOODAHA MAXAMED YUUSUF
CAYNAAN

OG: WAKIIL DACWAYSANHA KHADAR XASAN
MAXAMED

OG: TALIIYAHA QAYBTA GOBOLKA AWDAL
BORAMA

OG: XEERILAALIYAHA GOBOLKA AWDAL

OG: TALIIYAHA XABSIGA EE DEGMADA
BORAMA

OG: TALIIYAHA ASLUUBTA JSL
HARGEYSA

OG: GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
HARGEYSA

UJEEDO: QARAAR XAYIRAADA MAXKAMADEED.

MAXKAMADDA GOBOLKA AWDAL:

MARKAY ARAGTAY: Gal dacwadeedka madaniga ah ee sumadiisu kor ku xusan tahay.

MARKAY ARAGTAY: Arjiga codsi xayiraad ee ku taariikhaysan 15/7/2014 ee uu maxkamada gobolka awdal usoo gudbiyay xeerilaaliyaha gobolka awdal kuna codsanaayo in la xayiro beerta uu soo dhex galaha ka yahay dacwadeeduna ka socoto maxkamadda ay na isku hayaan labada dhinac ee kor ku xusan kuna sheegay arjigiisa in beertaa la qodaayo waxna laga qabanaayo.

MARKAY ARAGTAY: qodobada 293,294,295
XHM

WAXAY QARAARISAY SIDAN:

1. Waxay xayirtay beerta ay dacwadu ka socoto ee ay isku hayaan labada dhinac ee aan kor kusoo sheegnay xeerilaalintuna uu soo dhex galay isagoo ku dacwiyaaya inay goobtaasi tahay beertii ciidanka asluubta lahaan jirtay , beertaasi oo ku taala seeraha boorama jihooyin keeduna yihiin BARI: beerta guulwada yaasha GALBEED: beerta axmed yabaal KOOFUR 'beerta cawaale

bustaale, WAQOOYI' beerta daahir ciisood iyo cali nageeye.

2. Beertaasi way xayiran tahay lama qodi karo, lama iibin karo, laman hibayn karo, sifana kalena looma badali karo, inta ay maxkamadu dacwadeedu go"aan ka soo sarayso.
3. Taliyaha saldhiga dhexe ee Degmada Boorama waxa lagu amrayaa inuu la socdo dhaqan galka xayiraada.
4. Garyaqaanka Guud Ee Qaranka waxan ka codsanaynaa inuu kazoo qayb galo dhagaysiga dacwada ama cid usoo wakiisho, maadaama ay khusayso dan guud.
5. Waxa la mudeeyay dhagaysiga dacawada 09/08/2014., waxana la faraya dhinacyada inay mudadaa diyaar soo noqdaan.
6. Qaraarkan waxa la soo saaray manta oo bishu tahay 17/07/2014.

C/RAXMAAN ROOBLE BARRE
GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA AWDAL
BORAMA